Qoormada 4 aad April 2012

# UNPOS Quarterly

*Horumarinta Nabadda iyo Dibuheshiisiiinta Soomaaliya*



# Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Soomaaliya oo u guuray magaalada Muqdisho 17 sanno ka dib

# Farriin ka socota Ergeyga Gaarka ah




Ergeyga gaarka ee QM Augustine Mahiga

Ku soo dhowaada nuqulka afaraad ee Wargeyska Saddex-biloodlaha ah ee UNPOS. Waxaan ku faraxsanahay inaan farriintan idiin ka soo qoro magaalada Muqdisho, oo aan u guuray 24kii bishii Janaayo. Waxaan degay caasimadda si aan ugu dhowaado maalin walbana ula xiriiro dadka iyo madaxda Soomaaliyeed ee aan wada shaqeyno, taasina waxay naga kaalmeynaysaa inaan "ka soo kabano waqtigii naga lumay." Waxaan welina ku sii dhiirrigelinayaa xubnaha kale ee bulshada caalamka inay halkan nagu soo biiraan iyagoon daahin si ay u muujiyaan hawsha ay ka hayaan Soomaaliya, ayna goobta u joogaan si ay kaalmo uga geystaan horumarinta geeddisocodka nabadda.

Toddobaadyadii la soo dhaafay waxaa dhacay dhacdooyin aad u waaweyn. Dalku weli wuxuu ku jiraa qalalaase baarlamaan oo xayiray xitaa hawlihii ugu darnaa ee asaasiga ahaa ee sharcidejiyeyaasha (xildhibaanada). Inkastoo xaaladda hadda jirta ay cakirantahay, haddana waa fursad aad u weyn. Waxaan guulo la taaban karo ka gaarnay Qorshe-Hawleedka lagu dhammeynayo xilliga ku meelgaarka. Ka dib markii la qabtay Shirkii Kowaad ee Wadatashiga Dastuurka Soomaaliyeed ee lagu qabtay Garoowe, Maamulka Dowladda Puntand, bishii Diisembar, waxaan markaa ka dib qabanay Shirkii labaad ee Dastuurka oo guul ku dhammaaday oo la qabtay 15kii ilaa 17kii bishii Febraayo. Shirkan oo loo yaqaano Shirkii Garoowe ee 2aad, wuxuu caddeeyay aragti qeexan ee dowladda mustaqbalka ee ay Soomaaliya yeelan dooonto, oo ka kooban nidaam federaali ah oo leh baarlamaan ka kooban aqal sare iyo aqal hoose oo ugu yaraan boqolkiiba 30 xubnihiisu ay haween yihiin. Ansaxinta Qabyo-qoraalka dastuurka oo uu ansaxiyo Golaha Dastuurka Qaran waxaa loo qabtay inay dhacdo 22ka bisha May 2012.

Waxaa la garowsaday in hanaanka kalaguurku uusan ahayn mid dad gaar ah u xiran ama mid kor laga soo unko. Tani waxay ahayd arrin muhimsan oo ka soo baxday shirkii Garoowe, oo ahaa mid si ballaaran looga wada qaybgalay ayna si xoog leh uga qaybqaateen saameyna ku yeesheen xubnaha bulshada rayidka qaybaheeda kala duwan. Gole Dastuur oo u eg ama u dhigma Soomaaliya – oo dad gaaraya 1,000 qof oo Soomaali ah oo ka kala socda bulshada qaybaheeda kala duwan – ayaa la sameyn doonaa. Ergadiisu waxay ka iman doonaan degaannada hoose. Arrintan waxay u baahnaan doontaa shaqo aad u weyn si hawsha loogu dhammeeyo waqtigii loo dejiyay. Caalamku wuu daawanayaa, noomana harin waqti badan oo aan lumino.

Mar haddii Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay uu soo saaray Qaraarka tirsigiisu yahay 2036 (ee 22 Febraayo 2012) ee lagu ballaariyay awoodda iyo tirada ciidamada AMISOM iyo taageerada Qaramada Midoobay ay siiso AMISOM, ciidamda AMISOM waxaa u suurtogeli doonta inay xasilin dheeraad ah ay ku sameeyaan xaaladda magaalada Muqdisho iyo meelaha ka baxsanba. Ciidamada AMISOM waxay horeyba u gaareen horumar la taaban karo. Mar haddii ciidamada Kenya ay ku soo biireen, waxaan filaynaa inay guushaasi sii socoto. Mar kastoo dhulka la xoreeyo u kordho, waxaa muhiim noqonaysa in Dowladda Federaalka KMG lagu taageero inay sameyso dibuheshiisiin ka dhex dhacda bulshada, dib u soo celiso sharciga iyo kala dambeynta iyo caddaaladda, dhiirigelisana in si degdeg ah loo sameeyo maamullada degaanada iyadoo la raacayo hanaan wadatashi oo loo wada dhanyahay. Sida aan marar badan

sheegay, dadweynaha Soomaaliyeed waa inay sida ugu dhakhsiyaha badan u helaan faa'iidada nabadda.

Farriin kaloo aan u gudbiyay Golaha Amaanka waxay ahayd in digniin loo jeediyo "qaswadayaasha" – kuwaasoo ka faa'iideysanaya dhibaatada dabadheeraatay ee ka jirtay Soomaaliya labaatankii sanno ee la soo dhaafay. Waxaan doonayaa inaan ku nuuxnuuxsado arrin mihim ah: geeddi-socodka siyaasadda kaalin ayaa uga banaan dhammaan dadka niyadsamida leh. Hase ahaatee, qaswadayaasha aan dooneynin inay xasillooni ku soo noqoto Soomaaliya ama iskudayaya inay horjoogsadaan geeddi-socodka siyaasadda, ha ahaadeen kooxo ama shakhsiyaadba ama ha ka tirsanaadeen urur siyaasadeed ama diineedba, waa in la tilmaamaa lagana hortagaa. Waxaan aad uga walaacsanahay iskudayga ula kaca ah ee ay wadaan kooxo ama shakhsiyaad doonaya inay weeciyaan Qorsh-hawleedka, doonaya inay muddo kordhin kale ku sameeyaan xilliga ku meelgaarka, sidoo kalena doonaya inay carqaleeyaan inay arrintu noqoto mid loo wada dhanyahay sida ku qeexan lana doonayo in lagu hirgeliyo Qorshe-hawleedka iyo hanaankii geeddi-socodka Garoowe.

Soomaaliya waxay maraysaa waqti aad u wanaagsan: waxaa hawada laga dareemayaa awood iyo yididiilo cusub anagoo ka shaqaynayna inaan hirgelino hawlaha waaweyn ee dalka loo dejiyay. Sidaasi waxaa laga dareemi karaa shirarka caalamiga ah, sida Shirkii London, oo dardar cusub geliyay geeddi-socodka siyaasadda muujiyayna heerka uu gaarsiisanyahay sida ay bulshada caalamku ugu soo jeeddo arrinta Soomaaliya. Waxaa sidoo kale laga dareemi karaa dadka Soomaaliyeed ee arrinta ku hawlan oo hadda soo galay dareen cusub oo ah in loo baahanyahay waxqabad iyo aragti gaarsiisa dhammeynta xilliga ku meelgaarka iyo marxalad cusub ee taariikhda Soomaaliya. Xaaladda hadda ka jirta Soomaaliya way isbedeli doontaa, mustaqbalkana idinka – dadka Soomaaliyeed – ayaa horseed u ah. Annagu waan idin garab taaganahay, waana sii wadi doonaa. ■

***Danjire. Augustine P. Mahiga***

# Tusmada Qormadan


2 Farriin ka socota Ergeyga Gaarka ah

4 Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Soomaaliya oo u guuray magaalada Muqdisho 17 sanno ka dib

5 Saddex iyo toban la haysteyaal ah oo aaday Burma ka dib markii ay madaxfurasho u haysteen burcad badeed Soomaali ah

6 Dhallinyarada Somaliland oo muujinaya xooggooda

7 Bulshada Rayidka oo codsanaysa in laga qaybgeliyo Qorshe-hawleedka

8 Kaydka suugaanta Soomaaliya oo khatar ugu sugan inuu lumo

9 Dad Soomaaliyeed oo caadi ah oo Puntland hawlo dheeraad ah ka wada

10 Badbaadinta dadka iyadoo uu dagaal socdo

11 Gargaarka baniaadanimo ee Soomaaliya waa in la sii wado si loo xoojiyo guusha laga gaaray gargaarka

12 Dowladda Federaalka KMG oo qaadday tallaabo lagaga hortagayo in carruurta askar laga qoro

13 Madaxda dalka oo shirarkii Garoowe ku ogolaaday inay awoodda dadka la wadaagaan

14 Dadaalka haweenka Soomaaliyeed oo ugu dambeyntii miradheliyay

15 Booqashadii Xoghayaha Guud ee Qarama Midoobay ku tagay Muqdisho

15 Hawlaha Guddiga Wadajirka ee Amniga

16 Qubanaha Kulamada Caalamiga ah

17 Barnaamijka hub ka dhigidda DDR oo nabad iyo xasilooni waarta u keenaya Soomaaliya


UNPOS


Contact:
Public Information Office, United Nations Political Office for Somalia

Email: unpos_pio@un.org

Website: www.unpos.unmissions.org

# Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Soomaaliya oo u guuray magaalada Muqdisho 17 sanno ka dib

*WQ. Nick Birnback, Madaxa Isgaarsiinta Guud, UNPOS*



Ergeyga gaarka ee QM Mahiga wuxuu la kulamayaa madaxweynaha

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Siyaasadda Soomaliya, Dr. Augustine P. Mahiga, ayaa si rasmi ah u furay xafiiska UNPOS ee magaalada Muqdisho maalintii Talaadada, 24kii Janaayo 2012.

Dr. Mahiga, oo ka soo degay gegida diyaaradaha caalamiga ah ee Muqdisho isagoo ay weheliyaan wefdi ka socda Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Aiyaasadda Soomaaliya (UNPOS), ayaa sheegay inuu ku faraxsanyahay inuu xarunta hawlgalka Qaramada Midoobay ee UNPOS u soo raray magaalada Muqdisho ka dib 17 sanno oo uu dibadda ku yaallay. “Hadda wixii ka billowda UNPOS waa inuusan ahaanin Xafiiska Siyaasadda u qaabilsan Soomaalia, balse hadda wuxuu noqonayaa Xafiiska Siyaasadda ee Soomaaliya,” ayuu yiri.

Iyadoo calanka Qaramada Midoobay uu la babanayo neecawda adag ee Badweynta Hindiya, ayaa Ergeyga Gaarka ah waxaa si diiran u soo dhoweeyay Ra’iisal Wasaaraha Soomaaliya Abdiweli Maxamed Cali iyo dad kaloo fara badan oo ay ka mid ahaayeen mas’uuliyiin Soomaaliyeed, diblomaasiyiin joogta Muqdisho iyo Nairobi iyo Taliye Ku Xigeenka Ciidamada Nabad-ilaalinta Midowga Afrika, AMISOM. Dr. Mahiga wuxuu sheegay in joogitaanka Muqdisho ay UNPOS ka kaalmeyn doonto inay si hoose ula shaqeeyo dadka ay hawsha wadaagaan, oo ay ka midyihiin Dowladda Soomaaliya, Hay’adaha Qaramada Midoobay, bulshada rayidka iyo dadka Soomaaliyeed ee caadiga ahba. Wuxuu ammaan u soo jeediyay diblomaasiyiinta shisheeye ee jooga magaalada Muqdisho, wuxuu sheegay inuu rajeynayo in safaarado dheeraad ah ay ku soo biiri doonaan.

“Waxaan rajeynayaa in geeddiga ay UNPOS ugu guurtay Soomaaliya uu noqon doono billowga waa cusub oo ah wadashaqeyn iyo wadaxiriir siyaasadeed,” ayuu yiri Dr. Mahiga. “Shaqo badan baa inasugaysa inaan qabano. Bilaha soo socda, Soomaalidu waxay ku heshiin doonaan dastuur cusub iyo weliba baarlamaanka oo dibuhabeyn lagu sameeyo iyo hawlaha kale ee waaweyn ee asaaska u ah Qorshe-Hawleedka aan ku kaalmeynayno Dowladda inay hirgeliso.”

Ergeyga Gaarka ah wuxuu socdaal ku tagay Madaxtooyada, Villa Soomaaliya, halkaasoo waraaqihiisa aqoonsiga ugu gudbiyay Madaxweyne Sheikh Sharif Sheikh Ahmed iyadoo ay joogaan mas’uuliyiin Soomaaliyeed oo fara badan, diblomaasiyiin iyo warbaahinta, markaa kadibna wuxuu wadahadal gaargaar ah la yeeshay dhowr ka mid ah mas’uuliyiinta Soomaaliyeed ee heerka sare.



Wakiilka gaarka ah waxa uu salaam sharaf ka qaadanayaa ciidanka AMISOM

Markaa ka dib wuxuu u soo noqday Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah si uu salaam sharaf uga qaato ciidamada Midowga Afrika mahadna ugu celiyo naftiihurenimada ay sameeyeen ciidamada Midowga Afrika iyo kuwa amniga qaranka Soomaaliyeed si ay nabad dalka ugu soo dabbaalaan.

Ergeyga Gaarka ah wuxuu sidoo kale taleefanka ku la hadlay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo uu uga warbixiyay inuu Muqdisho yimid. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa ku dhawaaqay markii uu socdaalkii taariikhiga ahaa ku joogay magaalada Muqdisho bishii hore in UNPOS uu Muqdisho u soo guuri doono.

Ergeygii Gaarka ahaa ee ugu dambeeyay ee Muqdisho deganaa, James Victor Gbeho oo u dhashay dalka Ghana, wuxuu la shaqaynayay Hawlgalkii Qaramada Midoobay ee Soomaaliya ee 2aad loona yaqaanay (UNISOM II), wuxuuna dalka ka tagay billowgii sannadkii 1995 markii uu hawlgalku dhammaaday. UNPOS, oo xarunteedu ahayd Nairobi, ayaa wax



Cayaaro iyo heesaha hiddaha iyo dhaqanka marka uu yimaado wakiilka gaarka ah ee xoghayaha guud ee QM

yar markaa ka dib la asaasay. Hase ahaatee, shaqaalaha hay’adaha kale ee Qaramada Midoobay ayaa sii joogay Soomaaliya sannadihii intaa ka dambeysay, maantana in ka badan 900 oo ah shaqaalaha qaramada Midoobay ayaa Soomaaliya jooga.

“Waxaan rumeysanahay in tani ay tahay fursad aad u weyn u tahay Soomaaliya,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah. “Waxaan sameyn doonaa wax alla wixii karaankeena ah si aan gacan idiin siino laakiinse ugu dambeyntii nabad oo ka dhalata Soomaaliya waxaa keeni doona Soomaalida oo qura. Nairobi waxaan u xiisi doonaa, laakiin waxaan ku hanweynahay inaan xafiiskayga cusub ka furto magaalada Muqdisho oo aan shaqada u fariisto.” ■

# Saddex iyo toban la haysteyaal ah oo aaday Burma ka dib markii ay madaxfurasho u haysteen burcad badeed Soomaali ah

*WQ. Donna Cusumano, Hawlwadeenka Isgaarsiinta Guud, UNPOS*



La heystayaasha reer Burma oo uu la socdo sarkaal ka socda safaaradda



Sarkaalka ka socda safaaradda oo uu weheliyo mid ka mid ah la heystayaasha



Laheystaha wuxuu la hadlayaa mid ka mid shaqaalaha QM

Ka dib markii ay in ku dhow 16 bilood ku jireen gacanta burcad badeed Soomaali ah, taariikhdu markay ahayd 31kii Oktoobar 2011, ayaa koox badmaaxiin ah oo u dhashay dalka Burma iyagoo aad u faraxsan ugu dambeyntii ka dhoofay Garoonka Diyaaradaha ee Jomo Kenyatta ee magaalada Nairobi iyagoo ku sii jeeda dalkooda. Nimamka 13ka ah waxay ka mid ahaayeen shaqaalihii markab kalluumeysata ah oo laga leeyahay dalka Thailand oo la yiraahdo P.V. Prantalay 12, oo ay burcad badeed Soomaali ah ka afduubeen isagoo mushaaxaya biyaha caalamiga ah meel in ku dhow 1200 oo nautical miles ah u jirta xeebaha Soomaaliya 18kii bishii April 2010.

Intii ay sugayeen duullimaadkii diyaaraddooda, shaqaale ka socda Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) ayaa kooxda siiyay waxyaabo yaryar oo dadkaas wax u tara sida dharka, kabaha cayaarta tenniska, boorsadaha socdaalka iyo cunto fudud, kooxduna way ku farxeen. Pan Aung, oo 36 jir ah oo aabbe u ah laba carruur ah, ahna midka keliya ee kooxda ka mid ah oo ku hadli kara wax Af Ingiriis ah, ayaa sheegay in dhibaatadoodu ay mid aad u adag. Wuxuu yiri inta badan ma ayna garanaynin waxa dhacayay. Inta badana ma ogeyn inay noolaan doonaan si ay mar kale u arkaan qoysaskooda.

Muddadii dheerayd ee la haystay, Aung wuxuu goobjoog u ahaa sida xun ee loola dhaqmay dadka kale ee ay burcad badeeddu haysteen. Wuxuu sheegay in la haysteyaashu aysan helin biyo nadiif ah ee la cabbo, kuwo badan oo ka mid ahna way bukoodeen markay cabbeen biyo dhanaan. Kuwo kale kama soo bixin gacanta iyagoo nool, inkastoo aan kala caddeyn waxa ku dhacay iyo intay tiradoodu dhammeyd.

La haysteyaasha waxaa ugu dambeyntii sii daayay kuwii haystay 6dii Agoosto sannadkan, laakiin dhibaatadoodu sidaa kuma dhammaanin. Kooxdu waxay sii joogeen Garoowe, caasimadda Dowladgoboleedka Puntland ee Soomaaliya intii saraakiisha Qaramada Midoobay ee Nairobi iyo New York ay diyaarinayeen waraaqihii socdaalka ee loo baahnaa. Saraakiisha hay'adaha Qaramada Midoobay ee IOM, UNPOS, UNDP iyo UNHCR ayaa si hoose u wada shaqeeyay si ay u fududeeyaan inay kooxda badmaaxiintu si nabad ah oo ikhtiyaari ah loogu celiyo dalkooda, iyagoo sidoo kalena la siiyay la talin xagga maanka ah.

Nimanku waxay waddanka deriska ah ee Kenya aadeen markii ay waraaqihii socdaalka la diyaariyay. Mas'uul ka socda Waaxda Qunsuliyadda iyo Arrimaha Sharciga ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Myanmar, oo Nairobi u yimid si uu nimankan dhallinyarada ah ugu galbiyo Myanmar, ayaa garoonka diyaaradaha ugu yimid si uu u wareysto una qaybiyo waraaqaha socdaalka rasmiga ah. Shaqaalaha UNPOS ayaa saraakiil ka socota IOM ku weheliyay sagootinta aan rasmiga ahayh ee loo sameeyay nimanka intayna ambabixin.

Sida laga soo xigtay Ururka Badaha Caalamiga (IMO), billowgii bishii Maarso 2012, burcad badeedda Soomaalidu waxay weli gacanta ku hayaan 263 la haysteyaal ah iyo 14 markab. Hau'adaha Qaramada Midoobay iyo bulshada caalamka ayaa haya wada shaqayn dhow si ay wax uga qabtaan burcad badeedda iyadoo la qaadayo tallaabooyin ka hortag ah sida mashaariic shaqo loogu abuurayo dadka laga yaabo inay burcad badeed ku biiraan, oo ayna ka midtahay in la adeegsado ilaalada xeebaha iyo in la abaabulo ololaha la dagaallanka burcad badeedda. Sidoo kale waxay ka shaqaynayaan dhismaha xabsiyada, dhismaha garsoorka Soomaaliya iyo wax ka qabashada arrimaha aalaaba loogu marmarsiyoodo burcad badeedda sida kalluumeysiga sharci darrada ah. ■

# Dhallinyarada Somaliland oo muujinaya xooggooda

*WQ. Daahir Maxamed Daahir, Hawlwadeenka Qaran ee Arrimaha Bulshada, UNPOS, Hargeysa*

Dimoqraadiyadda ka jirta Somaliland ayaa horumartay sannadihii la soo dhaafay waxaana la qabtay doorashooyin dhowr ah sida doorashadii ugu horreysay ee golaha deeggaanka, lana qabtay sanadkii 2002 dii, sidoo kale waxaa la qabtay doorashadii ugu horreysay ee Madaxweynaha sanadkii 2003, doorashadii baarlamaanka waxaa la qabtay 2005 tii, doorashada 2aad ee Madaxweynaha waxaa la qabtay bishii June 2010 kii.

Hase ahaatee, odayaasha dhaqanka oo keliya ayaa qayb ka ahaa habkani, dhallinyarada oo loola jeedo kuwa ka yar 35 sano looma oggolayn inay u istaagaan wax kasta oo doorasho ah 60% ama 70% inta u dhaxeysa ayaa dadweynaha reer Somaliland waxay yihiin dad da'doodu ka yar tahay 30 sano, sidaasna waxaa qaba warbixin ay soo saareen dhallinyarada kuwaasoo xiriir la lahaa hay'dda samafalka ee OXFAM ee Dutch ka ah iyo warbixin ay soo saartay UNDP. Inkastoo afar ka meel meel ka mid ah dhallinyaradaasi ay yihiin kuwo wax bartay. Xilligaan hadda la joogo 25,000 ardey ah ayaa ku jira 70 Dugsi iyo 12,000 oo kalena waxay ku jiraa Jaamacadaha Somaliland inta badan kuwa ka soo qalin jebinaaya dugsiyada sare, machadyada iyo jaamacadaha waa dad shaqo la'an ah, marka u dambeysana waxay si sharci darro ah ugu haajiraan Yurub.

Markii ay socotay ololihii doorashii la qabtay 2010 kii, xisbiyada waaweyn qoorshahooda waxaa ugu waa weynaa inay horumarinayaan dhallinyarada. Xisbiga Kulmiye, oo ah kii ku guuleystay doorashada wuxuu sameeyey dhowr ballan qaadyo oo ay ka mid ahayd inuu ku tixgelianaayo dhallinyarada jagooyinka dawladda, uuna horumarinaayo dhallinyarada inay qayb ka ahaadaan awoodda fulinta ee go'aan gaarista iska leh , ayna ka qaybgalayaan maamulka dawladda hoose, si ay u horumariyaan dawlada wanaagga. Ardeydii jaamacadaha dhiganaayay ayaa gacan ka geystay qabsoomidda doorashooyinka, waxayna ka qayb qaateen dhammaan heerarkii doorashada ay mareysay ha ahaato heer Qaran ama heer degmo.


Maamulka cusub wuxuu awoodda la wareegay bishii July 2010 kii laakiin dadka dhaliila waxay yiraahdaan maamulkani ma fulinin inta badan ballanqaadyadii uu u sameeyey dhallinyarada ilaa iyo hadda maamulka hada jiraa wax 10 qof ka yar ayuu u magaacabay xilalka Agaasimo Guud iyo Agaasimayaal waaxeed, inkastoo arrintani ay horumar tahay marka loo eego maamulladii hore hadana dad badan ayaa yiraahda arrintani kuma filna.

Ururka dhallinyarada Soomaaliland ee marka la soo gaabiyo magaciisu la yiraahdo (SONYO) waa urur firfircoon oo rayid ah isla markaana ah dallad ay hoos yimaadaan dhallinyarada ayaa soo istaagay si uu u qabto hawlaha dhiman, wuxuuna billaabay inuu ku dadaalo sidii khad cusub oo siyaasadeed loogu jeexi lahaa dhallinyarada, shaqana loogu heli lahaa , ayna arrintu u noqon lahayd bilowgii dawlad wanaagga. Ururka SONYO waxaa la aasaasay sanadkii 2003 dii, si uu u mideeyo codka dhallinyarada uuna helo hab la isku hallayn karo oo meel mar ah oo siyaasadeed oo u oogolaanaya dhallinyrada inay ka qayb gasho hawlaha waddanka. Ururkani waxaa u hawlgalaaya qoorshooyin lagu shaqaaleynaayo dhallinyarada , wax lagu baraayo, sida xuquuqda aadanaha, dimoqraadiyadda iyo hoggaamintaba.

Iyadoo ay ugu wacan tahay dadaallada uu sameeyey ururka SONYO ayaa bishii Oktoobar 2012 kii, ayaa Baarlamaanka Soomaaliland isbeddel ku sameeyey sharciga tirsigiisu yahay number 20 si hoos loogu dhigo da'da loogu tartami karo golaha deegaanka, taasoo markii hore ahayd 35 sano haddana laga dhigay 25 sano. Bil kadib ayaa aqalka odayaasha uu ansixiyey bedelaaddii lagu sameeyey sharciga waxaana ansixiyey Madaxweyne Siilaanyo. Sidoo kale Dhallinyarada waxay dhinac iska dhigeen kala qeybsanaantii qabiilka, waxayna isku diyaarinayaan sidii ay uga qaybgali lahaayeen doorashooyinka soo socda ee golaha deegaanka kuwaasoo la filaayo inay dhacaan bisha April. ■






Celcelis ahaan dadka Somaliland da'doodu waxay ka hooseeysaa 30 sano jir

# Bulshada Rayidka oo codsanaysa in laga qaybgeliyo Qorshe-hawleedka

*WQ. Shinuna Karume, Hawlwadeenka Arrimaha Bulshada, UNPOS*



Xarunta bulshada rayidka UNPOS

Markaan doonayno inaan gudagalno xulashada wakiillada "dhabta ah" ee bulshada raidka ee Soomaaliya maanta waxyaabaha maskaxda ku soo dhaca waxaa ka mid ah ereyo dhowr ah sida: ka wakiil ah, run ah, dhab ah. 20kii sanno ee uu socday dagaalka sokeeye oo aan jirin dowlad shaqeynaysa, bulshada rayidka Soomaaliyeed ayaa inyar inyar u buuxisay meelihii ay baneysay dowladda sida bixinta adeegyada asaasiga ah (caafimaadka, biyaha, waxbarashada, iwm), gargaarka baniaadanimo, amniga iyo xasilinta, nabad dhelinta iyo dibuheshiisiinta, iyo taageeridda mashaariicda horumarinta.

Inkastoo maamullada qaarqood ay u arkaan kuwo kula tartamaya dhaqaalaha laga helo bulshada caalamka, maamullada talada haya waxay inyar inyar u garowsadeen in loo baahanyahay in lala shaqeeyo bulshada rayidka iyadoo la eegayo waaya aragtinimada ballaaran ee ay leeyihiin, habdhismeedkooda iyo kartida ay u leeyihiin inay dadka u adeegaan.

Tani waxay dhalisay in Shirkii Bulshada Rayidka lagu qabto magaalada Muqdisho 26kii – 28kii bishii November 2011, kaasoo ujeeddadiisu ahayd in Bulshada Rayidka laga qaybgeliyo hirgelonta Qorshe-hawleedka dhammeynta xilliga ku meelgaarka. Waxaa la isku raacay in guul laga gaaro afarta qaybood ee Qorshe-hawleedka ay xirantahay in laga wada qaybqaato. Qaramada Midoobay waxay hore u xaqiijisay in bulshada rayidka laga qaybgeliyo hawlaha waaweyn ee dalka – tusaale ahaan diyaarinta qabyo-qoraalka dastuurka.

Shirkii bulshada rayidka ee Muqdisho wuxuu ahaa iskudaygii ugu horeeyay tan iyo intii la dhisay Hay'adaha Federaalka KMG iyo maamullada gobollada ee lagu soo dhoweeyay bulshada rayidka ee arrinta ku hawlan. Saddex dalool oo hal oo ka mid ah 60ka xubnood ee ka soo qaybgalay shirka waxay ahaayeen haween. Shirku wuxuu ku billowday iyadoo dadka qaarkood ay su'aalo ka keeneen sababta ka qaybgalkooda dib loogu dhigay, saddex bilood ka dib markii Muqdisho lagu qabtay kulankii ugu horeeyay ee lagu ogolaaday Qorshe-hawleedka dhammeynta ku meelgaarka bishii September 2011. Hase, ahaatee, markay dooddu hore u socotay, xamaasadii waxay isu rogtay baaq xoog leh oo loo jeediyay in laga wada qaybqaato hirgelinta Qorshe-hawleedka iyo hanaanka kormeerkaba.

Bulshada rayidku waxay soo jeediyeen talooyin lagu taageerayo hirgelinta Qorshe-hawleedka. Dhanka amniga, waxay codsadeen "in la xoojiyo xiriirka iyo iskaashiga ay la leeyihiin Dowladda iyo hay'adaha amniga heerka qaran, midka gobol iyo midka degmo intaba iyadoo la raacayo hanaankii la isku afgartay." Sidoo kale waxay codsadeen in "loo ogolaado inay ka qaybgalaan guddiyada iyo guddi-hoosaadyada hadda jira ee hirgelinta Qorshe-hawleedka," iyo inay "lahaadaan kaalin kormeer si ay Hay'adaha Federaalka KMG, maamul goboleedyada iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca ugu la xisaabtamaan hirgelinta Qorshe-hawleedka." (Waxaa sidoo kale la garowsaday in guul laga gaaro Qorshe-hawleedka ay ku xirantahay taageero laga helo dadka Soomaaliyeed, waxaana lagu baaqay in dadaalka la isugu geeyo arrinta.

Waxaa shirka lagu soo gunaanaday niyadsami aad u sareysa iyo xamaasad cusub. Bulshada rayidkuna waxay ballanqaadeen inay iyagu hawsha la xiriirka dadweynaha si ay Qorshe-hawleedka ugu helaan taageerada bulshada heerka degmooyinka. Iyagoo ay Hay'adaha Federaalka KMG iyo maamullada iyo weliba bulshada rayidkuba muujiyeen inay ka go'antahay inay taageeraan Qorshe-hawleedka, rajada laga qabo in lagu guuleysto hirgelinta Qorshe-hawleedka aad iyo aad bay u fiicantahay. ■

# Kaydka suugaanta Soomaaliya oo khatar ugu sugan inuu lumo

*WQ. Susannah Price, Hawlwadeenka Isgaarsiinta Guud, UNPOS*

Soomaalidii ku soo laabatay magaada Muqdisho markii ugu horeysay tan iyo billowgii dagaalka 20 sanno ka hor, waxay badanaa ka sheegtaan inaan waxba ka harin magaaladii quruxsanayd ee dhaqanka lahayd ee ay hore u yiqiineen. Allay lehe, wax badan baa iska bedelay. Hase ahaatee, qol dambe ee ka tirsan Wasaaradda Isgaarsiinta waxaa ku jira hanti qiimo badan oo ah taariikhda Soomaaliya – waa kaydka Idaacadda Radio Muqdisho.

Qolkan mugdiga ah waxaa ka buuxa xirmooyin cajalado ah oo cabirkoodu yahay rubuc inch ama hiish – si fiicana loogu raseeyay sanaadiiq baakado ka sameysan oo rafaf (shelfs) ku raseysan, kuna soo daadanaya miisaska iyo dhulka, tustada ama waxyaaba ku jirana gacanta lagu qoray. Sida laga soo xigtay saraakiisha ku lug leh, in ka badan 35,000 oo cajalado ah ayaa yaalla kaydka. In ka badan kala bar oo ka mid ah waa heeso laakiin waxaa ku jira riwaayado, gabayo, barnaamijyo diini ah, khudbado iyo warar kale oo ku baxay afaf shisheeye, sida Af Talyaaniga, Af Carabi iyo Af Ingiriis.


Ururinta kaydka waxaa la billaabay sannadkii 1951 – oo ah isla sannadkii la furay Radio Muqdisho. Ururintu waxay ku billaabatay si tartiib tartiib ah laakiinse waa la kordhiyay sannadihii xigay. Heesaha intooda badan waa heeso jacayl inkastoo qaar ka mid ihi ay xambaarsanyihiin dhalleecayn qarsoon oo jeediyay Dowladda, inta badan gabayaagana waxaa loo xiray heesihii ay allifeen. Sidoo kale waxaa ku jira heeso soo dhoweyn ah waxaana ka mid ah hees loo allifay hogaamiyihii Shiinaha Hantiwadaaga ah ee muddada ugu dheer talada hayay, Zhou Enlai, iyo mid hadda uun loo allifay soo degidda UNPOS ay soo degtay magaalada Muqdisho. In badan oo ka mid ah heesahan, riwaayadahan iyo gabayadan weli aad baa loo jeceylyahay welina waxaa laga sii daayaa Radio Muqdisho maanta.

Waxaa nasiib darro in wararka iyo barnaamijyada ka hadlaya dhacdooyinka jira aan weligood la kaydinin. Hase ahaatee, waxaa jiira barnaamij gaaban oo taariikhi ah oo la duubay markii madaxbannaanida Soomaaliya lagu dhawaaqay habeen barkii 1da bisha Luulyo 1960 iyo weliba heesihii loo allifay madaxbannaanida Soomaaliya.

Waxaa kaydka ku jira in ku dhow 2000 oo khudbado oo uu jeediyay Madaxweynihii hore Maxamed Siyaad Barre iyo 800 oo ay jeediyeen Madaxweyneshii kale ee isaga ka horeeyay. Waxaa jira khudbado oo ay jeediyeen Ra'iisal Wasaareyaal badan, inkastoo cajaladihii khudbadihii Ra'iisal Wasaarihii ugu horeeyay Cabdullaahi Ciise ama waa la tirtiray ama way lumeen. Sidoo kale waxaa jira in ka badan 400 oo khudbado oo uu jeediyay hogaamiye kooxeedkii afgembiyay Siyaad Barre, Maxamed Faarax Caydiid. Waxaa muuqata in Caydiid iyo Cali Mahdi, oo ahaa madaxweynihii ugu horeeyay ka dib markii la riday Siyaad Barre, ay labaduba garteen muhimadda uu kaydku leeyahay waxayna u soo direen waardiyeyaal ka ilaaliya in waxyeello loogu geysto ama lagu biliiqaysto dagaalka.

Kaydiyaha hadda gacanta ku haya waa Abshir Cali oo halkan joogay oo hawshan hayay tan iyo markii la riday Madaxweyne Siyaad Barre sannadkii 1991. Wuxuu sheegay in waxyaabaha la kaydiyay 20kii sanno ee dagaallada ay aad u yaryihiin, iyo inaan waxba aan hadda la kaydinin tayo ama karti la'aan darteed inkastoo Idaacadda Radio Muqdisho la soo celiyay ayna shaqeynayso 24 saac maalintii.

Dhibaatada ugu adag ee hadda jirta waa xaaladda cajaladaha oo aad sii baaba'aysa. Qaar ka mid ah waaba kharibmeen lamana hagaajin karo. Waxaa jira deeqo kala duwan oo ku deeqay inay cajaladahan u rogaan kuwo digital ah si loo badbaadiyo, ilaa iyo boqolkiiba shan ayaana sidaa laga dhigay. Dowladdu waxay hadda codsanaysaa kaalmo lagu badbaadiyo kaydkan muhimka ah ee taariikhiga ah. ■



Howlwadeen Abshir Hashi Ali oo ko jira gudaha madhafka

# Dad Soomaaliyeed oo caadi ah oo Puntland hawlo dheeraad ah ka wada

*WQ. Lucie Sewe, Joornaalka UNPOS*

Billowgii qarnigii 21aad dad badan oo reer Puntland ah ayaan u maleynaynin in buugaagtu ka mid noqon karaan baahida aadka u weyn ee ay qabaan maadaama dadkaasi ay la soo gudboonaatay arrimo kale oo aad uga weyn: sida dad badan oo ka soo cararaaya colaadda Muqdishu taalla, burcad badednimada ka jirta xeebaha iyo dad badan oo iyaguna waxna qori karin waxna aqrin karin, hase ahaatee Cabdirashiid Cali, oo hadda ah Agaasimaha Maktabada iyo Keydinta Xogta Puntland ayaa isana fikir kale qabay, aad ayuu uga welwelaayay xaaladda ka jirta puntland, halkaasoo waxbarashada iyo helitaanka xogtaba ay dhib weyn ka jirtay, arrintaas ayaa ku dhiirogelisay inuu sameeyo maktabad, laakiin weligiis ma uusan filaynin in dadaalkiisa ay ka dhalan doonto xarun weyn oo xogta lagu keydiyo, una adeegaysa dhammaan dadka degen Puntland iyo Soomaaliya inteeda kaleba.

Mr Cali wuxuu ka tirsan yahay qurbo joogta Soomaalida ee Puntland ee ku noolaa Minnisota, wuxuuna billaabay inuu afkaartiisa ku dhex faafiyo saaxiibbadiisa, kuwaasoo kaalmo aad u weyn siiyey. Cali iyo xubnaha kale ee ka tirsan qurbo joogta reer Puntland ayaa hawsha u gogol xaaray, waxayna diyaar gareeyeen qoorshe (Proposal) soo jiitay lacag iyo kaalmo noocyo kale ah, kana timid qurbo joogta reer Puntland iyo deeq bixiyayaashaba, Wasaaaradda Maaliyadda Puntland ayaa gaday dhulkii Xafiiska, UNDP waxay qayb ka qaadatay dhismihii iyo Kompiyuutarradii, qalabkii kale ee war isgaarsiinta, qalab xafiiseedka, markii dambena wuxuu maalgeliyey xafiiska UNDP dad dhaqaale yaqaan ah iyo kuwo kale oo khabiir ku ah horumarinta dadka kuwaasoo markii dambe soo diyaariyey qoorshe istaraatiijiyadeed kana soo yaboohay kaalmo dhaqaale wadammada deeq bixiyayaasha.

Maktabada Puntland waxaa la aasaasay sanadkii 2007 dii, iyadoo ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay ay ahayd in reer Puntland loo helo goob dhexdhexaad ah oo ay kor ugu qaadaan heerka aqoontooda, fursadna ugu helaan xogta ku saabsan maaddooyinka kala geddisan iyadoo aan loo eegaynin kuwa ay yihiin mararka qaarkod maktabadu waxay noqotay meel aad caan u ah, guushii marka hore la gaaray ayaa ku guubaabisay kooxda (maamulaysay maktabada) inay ballaariyaan adeegga maktabada, una beddelaan maktabadda Xarun Cilmi Baaris.

Maktabadda Puntland iyo xarunteeda cilmi barista waa xaruntii ugu horeeysay ee cilmi baaris ee ku taalla gobolka, waxaa yaalla halkaasi buugaag aad u farabadan oo la akhristo (kana kooban kuwa fiction and non fiction) maktabadu waxay leedahay Kombiyuutar oo ku xiran internetka iyo qayb qaabilsan Information Technology, hoolal waaweyn oo shirarka, meel shaah laga cabo, meel baannan oo lagu sheekeysto iyo qolal kale, xaruntu waxay noqotay goob ay iskugu yimaadaan bulshada rayidka ah waxaana yaalla 40,000 oo buug wax ka badan oo ka hadlaaya arrimaha maamulka, dawladnimada, kor u qaadista wacyiga iyo maaddooyin kale oo dadka Soomaaliyeed muhiimad u leh.

Xarunta hadda waxay tababar siisaa dadka reer Puntland, tababarkaasoo ku saabsan xallinta khilaafaadka iyo farsamada la xiriirta dhegeysiga iyo gorgortanka. Dhallinyaradu waxay xarunta ka helayaan buugaag,



Xarunta Makhtabada Puntland

ka hadlaaya maaddooyin kala geddisan sida Fiisikis,Xisaabta iyo Sayniska. Intaas waxaa dheer, dhallinyarada waxaa la barayaa arrimo la xiriira Xuquuqul Insaanka, waxyeellada mukhaddaraadka, HIV iyo xirfadda warbaahinta, xisaabaadka iyo Teknoolojiyaddaba. Xarunta waxay horumarisaa dhaqanka wax akhrinta, Mudane Cali ayaa ku tilmaamay xarunta inay tahay goob wax lagu akhristo: ama goob dhexdhexaad ah oo u adeegta baahida dad badan. Agaasimaha Guud waxaa taageera shaqaale ka kooban 24 qof sida shaqaalaha maktabadda,khubaro oo dhallinyaro ah, tababarayaal, shaqaale amniga qaabilsan iyo shaqaalaha taakuleynta. Xarunta Cilmi Baarista Puntland waxaa gacanta ku haya Hay'ad la yiraahdo u adeegga qoyska Soomaaliyeed (SFS) taasoo xarunteeda ay tahay Garoowe, waxayna laba xafiis ku leedahay Boosaaso iyo Gaalkacyo, sidoo kalena Hay'addu waxay xafiis xiriirin ah ku leedahay Nairobi.

Intaas waxaa dheer Xarunta Cilmi Barista Puntland iyo SFS inay fududeeyeen qabsoomidda dhowr siminaar oo ku saabsan horumarinta Xuquuqul Insaanka Puntland,Dimoqraadiyadda iyo Is Maamulka, Nabad Sameynta, kor u qaadidda wacyiga iyo waxbarista dadweynaha. Xarunta Cilmi Baarista waxay isku xir muhiim ah ka sameysaa bulshada,dimoqraadiyadda, waxay dadka bareysaa faa'iidada la taaban karo oo ay leedahay is maamulka dimoqoraadiyadda ku dhisan.

Dad badan oo ka tirsan reer Puntland ayaa adeegsada xaruntaan. SFS waxay xooggeeda saartaa kooxaha aadka u jilicsan iyo liitaba sida dhallinyarada iyo hooyooyinka garoobka ah, dadka curyaaminta iyo kuwa laga tiro badanyahay. Siyaasiyiinta ayaa iyagana shirarkooda ku qabsada xarunta, Xarunta Cilmi Baarista Puntland ayaa ilaa iyo hadda 2 Milyan oo buug siisay dugsiyada, maamulka, NGO yada ay bulshadu leedahay ee ku yaalla Gobolka.

Mudane Abshir oo ah isku xiraha qoorshaha gobolka ee SFS ayaa sheegay in guulaha ugu weyn ee ay gaareen ay ka mid tahay inay dhallinyarada ka celiyeen hawlaha wax dhimaalka leh, odayaasha tuulooyinka oo la baray sidii ay u noqon lahaayeen nabad sameeyayaal, sidoo kalena dad aad u fara badan oo bulshada ka mid ah ayaa iyaguna la baray sidii ay ugu halgami lahaayeen nabadda.

Mudane Abshir ayaa ka warramay caqabadaha hor yaalla Xarunta. "casriyeynta buugaagta iyo dayactiridda xarunta ayaa qiimo badan ku kacay" ayuu yiri Abshir. Hawsha adeegga maktabadda waa lacag la'aan, Xarunta Cilmi Baarista Puntland kama qaaddo dhaqaale ku filan kuwa adeegsada Internetka (Ceyber Caffe), isticmaalka qolalka shirka, sidaas darteed xaruntu waxay si aad ah ugu tiirsantahay deeq bixiyayaasha. Deeq bixiyayaal kala geddisan iyo saaxiibbo kale (ha ahaadaan Soomaali ama kuwa aan ahaynba) ayaa kaalmo siiya xarunta, kaalmadaasoo isugu jirta lacag,buugaag,tababar …..iwm. Hase ahaatee, kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah ayaa loo baahanayahay si loo wado Xarunta Cilmi Baarista Puntland.

Sida uu sheegay Abshir hadafka ugu dambeeya wuxuu yahay in Xarunta Cilmi Baarista Puntland loo beddelo Xarun lagu tababaro shaqaalaha Dawladda, xarun kaloo cilmi baaris ahna laga sameeyo Muqdisho mustaqbalka dhow. ■

# Badbaadinta dadka iyadoo uu dagaal socdo

*WQ. Lucie Sewe Joornaalka UNPOS*



Ali Muse, Hulwadeen ambalaasooinka

Muddo sannado badan ah, Cali Muuse, oo ah ganacsade Tafaariiqley ah, ayaa sida dadka intiisa badan ee Muqdisho ku nool la kulmaan daawanaayey asagoo niyad jabsan bambooyin iyo xabado dhaawacaaya ama dilaaya dad aan waxba galabsanin oo rayid ah oo jooga agagaarkiisa . Dhacdooyinka sidaan oo kale ah ayaa ah kuwo mar walba ka dhaca caasimad ay ka jirto dagaal aan dhammaad lahayn, sidaasna waxaa aaminsanaa Cali Muuse. Waa ay iska yartahay xaalad sidaan oo kale ah wax laga qaban karo.

Hase ahaatee maalin ka mid ah sanaddii 2008 dii, Cali oo jooga suuqa weyn ee ganacsiga ee Bakaaraha ayuu arkay ruux uu markaasi hoobiye dhaawacay. Ninkii dhaawaca ahaa xanuun ayuu la taahayey, waxaana si xoog leh uga socdey dhiig, ugu dambeyntiina ruuxii ayaa geeriyooday maadaama ay goobtaasi jirin qof u fidiya gargaarka degdegga ah, amaba aysan jirin Abmalaas u qaadda Isbitaal, dhacdadaan fool xun ayaa ka yaabisay Muuse, sidaas darteed wuxuu go'aansaday inuu abaabulo dadweynaha gaar ahaan ganacsatadii si ay ula yimaadaan dadaal lagu badbaadinaayo nafta dadka – (ugu dambeyntii) Cali wuxuu sameeyey gaarigii keliya oo Ambalaas ah kana shaqeynaaya Muqdisho. Ambalaaska waxaa maamulaayey urur samafal (aan faa'iido doon ahayn) Lifeline Africa, ururkaasoo ka sahqo billaabay Muqdisho 2008, waxaana ururkaan maamulaayey koox Soomaaliyeed oo iskaa wax u qabso ku shaqeyneysey oo uu garwadeen u ahaa Cali Muuse. Shirkad Isgaarsiineed ee lagu magacaabo Nationlink Telcom ayaa ugu deeqday gunnooyin shaqaalaha,qalab isgaarsiin iyo shidaal lagu shubo gaarigaba , hawshu waxay ku billaabatay 5 Ambalaas iyo 50 qof oo ku shaqeynaaya iskaa wax u qabso ah. Markaas ka dib ayeey Shirkadda Nationlink ku deeqday 2 gaari oo Ambalaas ah, Ambalaas kale oo saddexaadna waxay uruka Ambalaasyada Afrika ee saldhiggiisu yahay UK. Shaqada u gargaarista dadka waa mid lacag la'aan ah, dadka khidmadeeda u baahanna lacag la'aan ayaa loogu adeegaa.

Cali wuxuu sheegay in maalmihii u horreeyey ay adkayd shaqadoodu, shaqaalihiisana marmar la soo weerari jirey. Laba ka mid ah wadayaashii gawaaridaas ayaa la dilay, kuwa kalena way carareen markii ay la kulmeen hanjabaad joogto ah. Gawaaridii Ambalaaska ahayd qaar waa la soo weeraray qaarna waa la gubay hase ahaatee muddo ka dib dadkii magaalada Muqdisho degenaa waxay oggolaadeen adeeggii loo qabanaayey. Mar waxaa jirtey inuu Cali badbaadiyo hooyo iyo cunug ay markaasi dhashay, kuwaasoo ay dhaawaceen kooxo ku dagaallamaayey Madaxtooyada agagaarkeeda, waxaana laga codsaday Cali in Ambalaas uu keeno saq dhex 02:00 AM. Asagoo isku dayaaya inuu badbaadiyo(hooyadii iyo cunuggeedii) ayaa mid ka mid ah dableydii dagaalka ku jirtey uu gaarigii weerar gaadmo ah ku sameeyey, dhaawacna u geystay gaarigii, gaarigii kale ee labaad ee Ambalaaska ahaa ayaa geesinimo sameeyey oo soo dhex jiiray xabaddii dhexdeeda si guul lehna ku soo gaarsiiyey hooyadii iyo cunuggeeddii Isbitaalka.

Cali oo 42 jir ayaa habeen walba markuu seexanaayo oo uu yimaado sariirta ayaan qiyaasi Karin inta saacadood ee uu jiifaayo ama aan qiyaasi Karin xaaladda sida ay noqon doonto maalinta xigta, laakiin Cali mar walba wuxuu diyaar u yahay inuu iska dhaafo wax kasta oo uu faraha ku hayo si uu u caawiyo dadka marka loo yeero. "anigu si iskaa wax u qabso ah ayaan ku caawinaayey dadka liita ee ku nool caasimadda dagaalka halakeeyey" ayuu yiri Cali "anigu 24/7 anigu waxaan dadka ugu adeegay si iskaa wax u qabso ah 24 jeer, adeegyadaasi waxay ahaayeen kuwa degdeg ah kuwa aan degdeg ahayn, waxaanna u adeegay kuwa dhaawacan,kuwa liita iyo kuwa Muqdisho iyo hareeraheeda ku barakacsanba."

Cali wuxuu soo toosaa aroor hore maalin walba, wuxuu dhageystaa warka ku saabsan xaaladda Muqdisho, ka dibna wuxuu meel isugu keenaa saaxiibbadiisa si uu ugu warramo (subax walba waxaa nala arkaayey annagoo ka hadleyna qoorshe hawleedka maalintaas aan qabaneyno) ayuu yiri Cali. Iyadoo ay arrintu ku xirantahay mar walba sida ay xaaladdu tahay, ayuu Cali baraarujinaayey wadayaasha Ambalaasyada iyo dadka kale ee sida Iskaa wax u qabsada ah ku shaqeynaayey(shaqaalaha heeganka ee barta hawlgelinta,wadayaasha iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka), shaqaalahaasoo dhegtooda u taagantahay wixii taleefoonno soo dhaca oo lagu soo dalbanaayo Ambalaasyada, lagana soo dalbanaayo meel kasta oo Muqdisho ka mid ah, haddii ay yihiin dugsiyada , xeryaha barakacaayasha,xafiisyada,isbitaallada iyo meel kasta oo caasimadda ka mid ah. Kooxdu waxay dadka u qabanayaan gargaarka degdegga ah, dadka ay wax soo gaareenna waxay geynayaan isbitaallada ama baraha kale ee caafimaadka ee ugu dhow si halkaasi loogu daweeyo. Cali wuxuu yiri nolosha Muqdisho ma aha mid la saadaalin karo, hase ahaatee waa in un ruux uu qabtaa shaqada muhiimka ah oo misana khatarta ah. "waa waajibaadkeyga aasaasiga ah inaan u adeego caasimadda" ayuu yiri Cali, kaasoo looga yaqaanno Soomaaliya iyo warbaahinta caalamiga ahba midkii hagaayey Ambalaasyada,sheegaayeyna faahfaahinta dhibka dhaca.

Muddo dheer ayaa Shirkadda Lifeline Africa waxay ahayd ururka keliya ee waday hawsha Ambalaasyada magaalada Muqdisho, hase ahaatee Cali wuxuu yiri Isbitaallada Muqdisho qaar ka mid ah ayaa hadda billaabay inay adeegsadaan Ambalaasyo. "Waxaa wax raali laga noqdo ah inaan ogaanno hawsha aan billaawnay inay tahay manta mid lagu dayan karo".

Cali oo xaaskiisa kula nool Muqdisho ayaa wuxuu sheegay in Shirkadda Lifeline ay caawisay 6753 qof oo dhaawac ah oo ay geysay Isbitaal sanadkii 2009 kii, 7100 qof oo kalena 2010 kii , 5242 qofna waxay Isbitaal geysay 2011 kii, baabuurta Ambalaasyada ayaa inta badan cilladeysmaayey iyadoo ay ugu wacantahay burbursanaanta waddooyinka iyo kharajka baabuurta lagu sameynaayey oo aad u sareeyey. Waxaana mar walba hoos u dhacaayey tirada dadka ku shaqeynaayey Iskaa wax u qabsada, waxayna gaartay tiradooda 23 maadaama Shirkadda Lifeline aysan awoodin inay dadkaas kharajkooda bixiso.


Weli, Cali wuxuu doonayaa in adeegyadii uu qabanaayey la gaarsiiyo Soomaaliya inteeda kale mustaqbalka dhow, Cali wuxuu rajeynayaa in maalin un Soomaaliya ay noqon doonto mid xasilloon si uu shaqadaan ugu wareejiyo mas'uuliinta ku habboon. ■

# Gargaarka baniaadanimo ee Soomaaliya waa in la sii wado si loo xoojiyo guusha laga gaaray gargaarka

*WQ. Ari Gaitanis iyo Roberta Russo, Hawlwadeenada Isgaarsiinta, OCHA*

Qaramada Midoobay waxa 3dii bishii Febraayo 2012, ku dhawaaqday inay dhammaatay xaaladdii macluusha ee ka jirtay Soomaaliya. Gargaarkii baniaadanimo oo la kordhiyay iyo beeraha oo dalagyo wanaagsan ka soo go'ay oo isbiirsaday ayaa gacan ka geystay in xaaladda baniaadanimo ay hagaagto. Haddana, iyadoo ay arrintu sidaa ay tahay, bulshada caalamku waa inaysan joojin hawsha: deeq dheeraad ah ayaa weli loogu baahanyahay saddex dalool oo hal oo ka mid ah dadka weli u baahan cunto, biyo saafi ah iyo kaalmo kaleba si ay u badbaadaan.

In ku dhow afar dalool oo saddex ee 2.34 milyan oo ah dadka ay haysato dhibaatada baniaadanimo waxay ku noolyihiin gobollada koonfureed ee Soomaaliya. Tirada nafaqa darrida iyo dhimashada ka jirta meelo badan oo ka mid ah koonfurta Soomaaliya ayaa weli ah kuwa ugu sarreeya adduunka – waana tii ugu darnayd ee Soomaaliya ka dhacda tan iyo abaartii 20 sanno ka hor dhacday. "Guusha la gaaray waa mid kooban wayna isbedelaysaa haddii aan taageerada la sii wadin," ayuu Mark Bowden, oo ah Isuduwaha Gargaarka Baniaadanimo ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya. "Waxaa koonfurta Soomaaliya ku nool dad gaaraya 1.7 milyan oo weli dhibaato ku jira."



Ilmo yar oo cunaya mushaari

Sida loola tacaalay macluusha waxay ahayd mid aan horey loo arag, iyadoo taageero degdeg ah laga helay deeqbixiyeyaasha. Tirada dadka Soomaaliyeed ee cunto helaya bil kasta way saddex jibbaarantay waxayna gaartay 2.6 milyan 90 maalmood gudahood markii lagu dhawaaqay abaarta bishii July. In kaalmada baniaadanimo oo sare loo qaaday ay billowday inay joojiso macluusha waxaa markii ugu horeysay caddaatay bartamihii bishii November markii Waaxda Amniga Cuntada iyo Falanqaynta Nafaqa-darrada ee Soomaaliya (FSNAU) iyo Shabakada Nidaamyada Digniinta Hore ee Macluusha (FEWS NET) ay ku dhawaaqeen in saddex goobood oo Soomaaliya ka mid ah – Gogollada Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose – ay ka soo kabsadeen macluusha ayna soo gaareen marxaladda ka horeysa macluusha.

Soomaaliya weli waxay ka mid tahay dhibaatooyinka baniaadanimo ee ugu waaweyn adduunka. Inkastoo la kordhiyay hawlgallada baniaadanimo, haddana waxaa la filayaa inay dhibaatadu sii jiri doonto ilaa iyo sannadka 2012, waxaana laga yaabaa inay ka sii darto bisha May, oo aad uga horeysa xilliga ay dalagyada beeruhu soo go'ayaan bisha August. Dagaallada sii kordhaya iyo mamnuucidda dhowr ka mid ah hay'adaha gargaarka ee ka hawlgala gobollada koonfureed ayaa sii carqaladeynaya dadaalladan. In ku dhow hal milyan oo Soomaali ah ayaa qaxooti ahaan ugu nool waddamada deriska ah. Dad gaaraya 300,000 ayaa ka qaxay Soomaaliya gaajada iyo dagaalka awgood sannadkii 2011 keliya, boqolaal kun oo kalena waxay ku barakaceen dalka gudihiisa.

"Waxaan u baahanahay inaan ka faa'iideysano fursadan oo ah dhibaatadii ugu ba'nayd oo si ku meelgaar ah looga soo baxay si aan dalaalkeena isugu geyno kaalmo nolosha lagu badbaadiyo, annago dhisayna kartida dadku ay u leeyihiin inay ka badbaadaan abaaraha mustaqbalka – sadaa darteedna la yareeyo inay ahaadaan kuwo gargaar ku tiirsan," ayuu yiri Md. Bowden. "Ka soo kabasho waxay suuroobi kartaa keliya marka ay soo go'aan dalagyada beeraha ka dib bisha August haddii la helo roob wanaagsan, arrimaha kale ee ka baxsan mowduuca, sida colaadahana, aysan carqaladeynin guusha la gaaray ilaa iyo hadda."

In gargaar lala gaaro dadka tabaaleysan ayaa weli ah dhibaatada ugu weyn ee hortaagan dadka ku hawl leh garaarka baniaadanimo ee Soomaaliya. "Waxaan si aad ah ugu tiirsanahay dareenka iyo baniaadanimada dhammaan dhinacyada isku haya dagaalka inay muujiyaan inay mar weliba diyaar u yihiin danta dadka Soomaaliyeed. Dhammaan dhinacyada is haya mas'uuliyad ayaa ka saran inay dhowraan sharciga caalamiga ah ee dagaallada ayna ogolaadaan in si shuruud la'aan ah lagu gaaro dadka tabaaleysan. Sidoo kale, dhammaan dhinacyadu waa inay yareeyaan dhibaatada dagaalku u geysto dadka rayidka ah," ayuu raaciyay Md. Bowden. ■

# Dowladda Federaalka KMG oo qaadday tallaabo lagaga hortagayo in carruurta askar laga qoro

*WQ. Ketevan Gagnidze, La Taliyaha Ilaalinta Carruurta, UNPOS*

Ka dib markii ay ku dhawaaqday bishii Janaayo inay qaadi doonto tallaabooyin adag oo lagu joojinayo in carruurta ciidan laga qoro sidaasna loo adeegsado, Dowladda Federaalka KMG waxay qabatay kulan-hawleed lagu dejinayo tallaabooyin adag oo lagu ilaalinayo carruurta lagagana hortagayo inay ka qaybqaataan dagaal hubaysan.

Isagoo ay taageerayaan Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS), Hay'adda Qaramada Midoobay ee Carruurta (UNICEF) iyo Xafiiska Ergeyga Gaarka ah ee Carruurta iyo Dagaallada Hubaysan, kulan-hawleedku wuxuu diiradda saaray afar arrimood oo kala ah: 1) tallaabooyin lagaga hortagayo in carruurta askar laga qoro, 2) hanaanka lagu aqoonsanayo laguna sii deynayo carruurta askarta ah, 3) siyaabaha carruurta dib loogu soo celinayo qoysaskooda iyo bulshada iyo 4) xoojinta hanaanka sharci ee dembi loogu aqoonsanayo carruurta oo askar laga qoro sarena loogu qaadayo ilaalinta carruurta.

Waddanka Soomaaliya, Dowladda Federaalka KMG iyo weliba kooxaha Al-Shabaab iyo Hizbul Islam ayaa Qaramada Midoobay ku sheegtay inay carruurta ka qoraan ciidan sidaasna u adeegsadaan. Sidaa darteed tallaabadan (kulan-hawleedkan) waa horumar laga gaaray sare u qaadidda ajendaha wax loogu qabanayo carruurta ku jira dagaalka hubaysan ee Soomaaliya.

Sidoo kale, wuxuu hawlgelinayaa ballanqaadkii ay Dowladda Federaalka KMG bishii November 2011 u sameeyay Mw. Radhika Coomaraswamy, oo ah Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Carruurta ku jirta Dagaalka Hubaysan. Intay booqashada ku joogtay magaalada Muqdisho, Mw. Coomaraswamy waxay ballanqaad ka heshay Madaxweynaha iyo Ra'iisal Wasaaraha Soomaaliya inay billaabaan hawl ay Dowladda Federaalka KMG ku dhammeynayso in carruurta ciidan laga qoro sidaana loo adeegsado. Sidoo kale waxay ballanqaad ka heshay Dowladda Federaalka KMG inay carruurta askarta ah ee Al-Shabaab ka soo goostay ka sii deyso xerooyinka lagu hayo una wareejiso meelo carruur keliya ay ku noolyihiin ama mar labaad ku biiriso qoysaskooda.

Tan iyo Shirkii Adduunka ee Carruurta ee la qabtay sannadkii 1990, Qaramada Midoobay waxay mar walba isku dayday inay



Ilmo yar oo askari ah

foosha xun ee haysata carruurta ay saameeyeen dagaallada hubaysan. Qaramada Midoobay ayaa Soomaaliya ka sameysay Guddi Hawleedka Waddanka ee Kormeerka iyo Ka warbixinta lixda xadgudub ee ugu waaweyn ee xuquuqda carruurta, guddiguna wuxuu dhaqangalay hawshiisana billaabay bishii April 2011 waxaana wada-guddoominaya UNPOS iyo UNICEF. Hanaanka kormeerka iyo ka warbixintu waa hawl la wadaago oo ay ka qaybqaadanayaan dhammaan hay'adaha Qaramada Midoobay, ujeeddadiisuna waa inuu bixiyo xog dhab ah, falanqayn iyo warbixin laga diyaariyo xaaladda carruurta ay saameysay colaadda hubaysan ee ka jirta Soomaaliya. Falanqaynta lagu soo bandhigo warbixinta waxay ku saleysantahay kiisas ama xaalado jira ee ku saabsan xadgudubyada waaweyn ee xuquuqda carruurta sida ay soo qoreen dad isku xiran oo waddanka jooga oo isugu jira Qaramada Midoobay iyo saaxiibada la shaqeeya ee difaaca carruurta. Sidoo kale wuxuu qeexayaa tallaabooyinka loo qaadayo ilaalinta carruurta iyo weliba hanaanka loo dejiyo si looga hortago ku takrifalka xuquuqda carruurta ee dhaca muddada warbixinta.

Kormeerka Guddi Hawleedka Waddanka ee Qaramada Midoobay ayaa sidoo kale noqonaya qayb ka mid ah Warbixinta Sannadlaha ah ee Xoghayaha Guud ee Carruurta iyo Dagaallada Hubaysan oo uu u soo gudbiyo Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay sannad walba. Warbixintan waxay ka hadlaysaa xadgudubyada xuquuqda carruurta ee ka dhaca adduunka oo dhan waxaana ka mid ah liis 'lagu magacaabo laguna ceebeeyo' dalalka iyo kooxaha aan dowliga ahayn ee xadgudubyada waaweyn ka gala carruurta, oo ay ka mid tahay in la magacaabo dhinacyada dagaalka isku haya ee carruurta askar ka qora sidaana u adeegsada.

Dowladda Federaalka KMG ayaa qaadday tallaabooyin wax lagaga qabanayo guud ahaan xadgudubyada xuquuqda carruurta, gaar ahaana lagula dagaallamayo in carrruurta askar laga qoro iyo in sidaa loo adeegsado si dowladda liiskan looga saaro. Tallaabooyinkan waxaa ka mid ah iyadoo ku baaqday in baaris lagu sameeyo carruurta ku jirta ciidamada qalabka sida ee Dowladda Federaalka KMG lana dejiyo siyaasad rasmi ah oo ka dhan ah in ciidamadeeda qalabka sida ay ka qorto qof kasta oo 18 sanno ka yar.

Hase ahaatee, dhab ahaan u hirgelinta ballanqaadyadan dhibaatooyin fara badan ayaa weli hortaagan. Xadgudubyada hadda socda waxay ka dhalanayaan iyadoon jirin hanaan hay'adeed ama dhismeed weyn sida habraac lagu kala sooco laguna ogaado da'da dhallinyarada ciidanka laga qoro. Iyadoon jirin hanaan hagaagsan oo lagu kala sooco laguna garto da'da, waxaa dhici karta in dhallinyaro da' yar ay weli ku jiraan Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed.

Qaramada Midoobay waxay taageeraysaa hawsha hadda socota ee lagu dejinayo Qorshe Hawleed lagu sii deynayo dibna bulshada loogu celinayo carruurta lala xiriiriyo ciidamada qalabka sida iyo kooxaha hubaysan. Tallaabo kale oo muhimsan oo hawsha lagu hormaninayo waxay ahayd magacaabidda saraakiil heer sare ah oo xiriiriyaal ah oo ka socda Dowladda Federaalka KMG lana shaqeynaya Qaramada Midoobay si ay uga shaqeeyaan dejinta qorshaha waxna uga qabtaan carruuta oo ciidan laga qoro sidaana loo adeegsado.

Qaramada Midoobay, gaar ahaan UNICEF, ayaa sidoo kale taageera siisa barnaamijyada lagu hornamrinayo dhaqancelinta carruurta xiriir la lahaa ciidamada qalabka sida iyo kooxaha hubaysan iyagoo la siinayo la talin xagga maanka ah, tallaabooyin carruurta dib loogu celinayo dugsiyada, lana siinayo tababar xagga kartida, iyo carruurta oo qoysaskooda dib loogu celinayo.

Hawsha la doonayo in la qabto weli wax badan baa ka hartay. Waxaa jirta xikmad ama maahmaah Afrikaan ah oo oranaysa "haddii aad doonayso inaad dheereyso (socod dheereeya) waa inaad keligaa socotaa, haddiise aad doonayso inaad meel dheer gaarto waa inaad wada socotaan (la socotaa dad kale)." Waa inaan dhammaanteena wada soconaa si aan u gaarno yoolka ama ujeeddada ah inaan gaarno in dhammaan carruurta Soomaaliyeed ay helaan mustaqbal wanaagsan, nabad ah oo iftiin leh. ■

# Madaxda dalka oo shirarkii Garoowe ku ogolaaday inay awoodda dadka la wadaagaan

*WQ. Cumar Aaden Qaadi, Hawlwadeenka Wacyigelinta Dadweynaha & Warfaafinta, Waaxda Wadajirka Dastuurka ee UNDP Soomaaliya/ UNPOS*




Wufuudda oo ka qeyb qaadanaya shirkii garoowe

Inta badan shirarka waaweyn ee Soomaaliya waxaa lagu qabtaa Nairobi – ama sidii bilihii dambe dhacday, magaalada Muqdisho. Sidaa darteed, aad baa loogu riyaaqay markii lagu dhawaaqay in laba kulan oo waaweyn ee lagaga doodayo dastuurka mustaqbalka lagu qabanayo magaalada Garoowe ee Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland. Ka dib markii la saxiixay Qorshe-hawleedka lagu dhammeynayo xilliga ku meelgaarka, saxiixayaasha Qorshe-hawleedka iyo xubnaha bulshada rayidka ayaa ku kulmay laba shir ee wadatashi dastuur oo loo yaqaano Garoowe 1aad iyo Garoowe 2aad si ay uga doodaan mabaadi'da dastuurka.

Intii shirka loo diyaargaroobayay, magaalada Garoowe waa la qurxiyay. Dadweynaha, ganacsatada iyo bulshada rayidkuba ayaa wada shaqeeyay. Magaalada waa la nadiifiyay, waddooyinka nalal baa la suray, kumaan kun oo ciidan ah baana laga soo bedelay qaybaha kale ee Puntland si amaanka u sugaan.

Billowgii shirkii Garoowe 1aad, ee la qabtay bishii December 2011, kumanaan dad ah ayaa saf ku istaagay dhinacyada waddooyinka laga soo billaabo garoonka diyaaradaha ilaa iyo Madaxtooyada iyagoo lulaya caleemo qooyan iyo ubaxyo si ay u soo dhoweeyaan wufuudda ka kala socota dhammaan dacallada Soomaaliya. Martigelinta la yaabka lahayd ee ay dadku muujiyeen ayaa u gogolxaartay jawiga wanaagsanaa ee shirka.

Shirkii Garoowe 1aad waxaa lagu lafaguray laba arrimood. Kow, ka qaybgalayaashu waxay xoogga saareen sidii lagu ansaxin lahaa dastuurka cusub. Waxaa lagu heshiiyay in qabyo-qoraalka ay si dadban u ansaxin doonto hay'ad wadatashi oo ku meelgaar ah, oo lagu magacaabi Golaha Dastuurka Qaran (NCA). Laba, shirku wuxuu dejiyay xubnaha uu ka koobanyahay iyo qaab-dhismeedka baarlamaanka cusub, oo ah hay'adda sharcidejin ee Soomaaliya. Waxaa lagu heshiiyay inuu noqdo baarlamaan laba aqal ka kooban oo u qaybsan aqalka sare iyo aqalka hoose.

Heshiiskii laga soo saaray dhammaadkii Shirkii Garoowe 1aad, oo loo yaqaano Mabaadi'da Garoowe, ayaa tilmaamaya sidii loo dhammeystiri lahaa dastuurka loona dhammeyn lahaa xilliga ku meelgaarka. Waxaa muhim ah in la xuso in inta badan Mabaadi'da Garoowe lagu saleeyay wadahadallo ay yeesheen kooxihii shaqada oo ay wufuuddu isu qaybiyeen, oo aan laga dhigin hab 'xagga sare' laga soo unkay. Ururrada bulshada rayidka, oo ay ka midyihiin ururrada haweenka ayaa kaalin muhim ah ka qaatay kooxahan shaqada. Hogaamiyeyaasha waa loo aqoonsadaa sida ay dadka ugu daayeen wadahadallada laya yeelanayo arrimo sidaa u muhimsan.

Inkastoo shirkii Garoowe 2aad, ee la qabtay bishii Febraayo 2012, uu raacay raadkii shirkii Garoowe 1aad, marayna isla wadahadalladii oo kale, ka qaybgalka bulshada rayidka ayaa kii hore ka xoog badnaa – xagga tirada iyo weliba saameynta ay ku yeesheen heshiiska.

Shirkii Garoowe 2aad wuxuu diiradda saaray saddex arrimood oo waaweyn laga billaabo in lagu heshiiyo federaalka oo noqda nidaamka dowladda. Waxaa lagu heshiiyay in dastuurku uu awoodda gobanimada u qaybin doono dowladda dhexe iyo dowladgoboleedyada iyo gobollada. In shir qaran oo sidaa u muhimsan lagu qabto Garoowe waa farriin muhim ah oo la xiriirta nidaamka federaalka cusub ee Soomaaliya, taasoo bixinaysa tilmaan ah in hay'adaha iyo awoodaha dowladda dalkoo dhan lagu faafiyo lana gaarssiiyo maamullada haysta ogolaanshe ballaaran oo ay dadka deegaankana la xisaabtami karaan.

Sidoo kale shirku wuxuu ka dooday faahfaahinta qaab-dhismeedka, xilka iyo xubnaha nidaamyada baarlamaanka iyo doorashada. Saameynta bulshada rayidka waxaa laga arki karaa heshiisyo badan oo waaweyn, ka ugu muhimsana uu yahay go'aanka ah in haweenku ay noqdaan boqolkiiba 30 ee dhammaan laamaha dowladaa, oo ay ka midyihiin Baarlamaanka iyo Laanta Fulinta. Ugu dambeyntii, ka qaybgalayaashu waxay diiradda saareen inay 'dhaqangeliyaan', oo ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagu hirgelinayo, mabaadi'dii lagu heshiiyay shirkii Garoowe 1aad.

Hanaanka Garoowe weli wuu socdaa. Tallaabooyinka lagu hirgelinayo Qorshe-hawleedka ee lagama maarmaanka ah in la qaado ka hor dhammaadka xilliga ku meelgaarka bisha Agoosto, way sii socon doonaan, shuruudaha hawlaha la qabanayana waa in laga soo baxaa. Iyadoo la raacayo Axdiga Federaalka KMG, Heshiiskii Kampala, Qorshe-hawleedka, mabaadi'dii Garoowe 1aad iyo Garoowe 2aad, ayaa la diyaariyay qorshe lagu dhammeystirayo qabyo-qoraalka 20ka bisha April 2012. Waxaa la sameyn doonaa hay'adihii loo baahnaa ee lagu heshiiyay, shirka dastuurka soo socda, oo diiradda lagu saarayo xuquuqda asaasiga ah iyo xoriyaadka dadka Soomaaliyeed, ayaa qorsheysan in dhammaadka bisha Maarso lagu qabto caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho. ■

# Dadaalka haweenka Soomaaliyeed oo ugu dambeyntii miradheliyay

*WQ. Charity Buga, Kaaliyaha Hawlwadeenka Arrimaha Haween, UNPOS*



Maryam Awais Jama oo ka aa MOWDAFA iyo TFG Wasiirka Gaashaandhigga Hussein Arab Isse, oo ka qeyb galay xiiritanka shirki arrimaha haweenka

Haweenka Soomaaliyeed waxay sannado badan muujiyeen kaalinta xasaasiga ah ee ay ku leeyihiin bulshada. Inkastoo bulshada Soomaaliyeed ay tahay mid raggu ku awoodbadanyahay, haddana kaalinta weyn ee ay haweenku cayaaraan waxaa laga dareemaa dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada. Iyagoo ah kuwa ay ku dhacday dhibaatada dagaalka inta badan, si xad dhaaf ah u saameeyay barakaca, xambaarsan culeysa qoysaska, xuquuqdoodana lagu xadgudbo, haweenka Soomaaliyeed waxay sidoo kale muujiyeen adadeeg aan caadi ahayn, iyagaana ah lafdhabarka bulshada Soomaaliyeed. Kaalintoodii ahayd inay yihiin kuwa daryeelka bixiya waxaa u dheer inay qayb weyn ka qaateen dhaqaalaha qoysaskooda iyo bulshadaba. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in la sharciyeeyo kaalinta ay haweenku ka qaataan hanaanka siyaasadda iyo go'aan qaadasha ummadda.

Haweenka Soomaaliyeed waxay sannado badan u ololeeyeen in saami gaar ah (quota) laga siiyo ka qaybgalka iyo metelaadda siyaasadeed iyo inay si waxtar leh uga qaybgalaan hanaanka siyaasadda iyo geeddi socodka nabadda. Inkastoo ballanqaadyo la sameeyo, haddana looma tarjumin guul dhab ah oo la tirin karo. Axdiga Federaalka KMG ee 2004 waxaa lagu heshiiyay in boqolkiiba 12 ay haween ahaadaan baarlamaanka. Billowgii xubnihii baarlamaanka ee 275ta ahaa waxaa ku jiray 18 haween ah oo keliya, taasoo ka dhigaysa boqolkiiba siddeed oo qura. Markii baarlamaanka dib laga ballaariyay lana gaarsiiyay 550 xubnood, waxaa ku jirta 22 xubnood oo haween ah oo keliya – oo u dhiganta boqolkiiba afar oo qura. Nabad waarta waxay u baahantahay in haween badan ay ka qaybgalaan. Sidaa darteed, Qaramada Midoobay iyo bulshada caalamkuba waxay dadaal badan ku bixiyeen in haweenka awood loo siiyo inay kaalintooda ka qaataan hanaanka siyaasadda iyo tallaabooyinka nabad dhisidda.

Si arrintan loo gaaro, Waaxda Sinnaanta Haweenka iyo Ragga ee UNPOS, iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Horumarinta Haween iyo Daryeelka Qoyska, ayaa diyaarisay hanaan ay haweenka Soomaaliyeed codkooda iyo aragtidooda ku soo biiriyaan hirgelinta Qorshe-hawleedka. Shirkii 2aad ee Garoowe, oo lagu ogolaaday in lagama maarmaan ay tahay in haweenku ay ugu yaraan boqolkiiba 30 ka helaan kuraasta dhammaan hay'adaha cusub ee dowladda - Guddiga Doorashada Ku Meelgaarka ee Madaxabanaan, Golaha Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka Qaran – taasoo ahayd mid aan hore loo arag, isbedel aad u weyn ayuu u ahaa haweenka Soomaaliyeed.

Laba kulan wadatashi oo ujeeddada laga lahaa ay ahayd in la doono aragtida haweenka ee ku aaddan arrimaha muhimka ah ee metelaadda ama ka qaybgalka, amniga, dastuurka iyo dibuheshiisiinta ee lala yeeshay 77 wakiil oo ka socda ururrada haweenka Soomaaliyeed ee ka kala socda Muqdisho, Galmudug, Ahlu Sunna Wal Jamaaca, Puntland iyo Guddiga Dastuurka Federaalka Madaxabanaan (IFCC) ayaa lagu kala qabtay Nairobi iyo Muqdisho bilihii November iyo December.

"Haweenka Soomaaliyeed waa inay kacaan, meel iska dhigaan dhammaan waxyaabaha kala geeya sida qabiilka si ay si buuxda oo waxtar lah uga qaybqaataan dhammaan dadaallada loogu jiro in nabad waarta lagu soo celiyo Soomaaliya," ayay tiri Mw. Luul Cabdi Aadan, oo ah Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Daryeelka Qoyska. Waxaa kulanhawleedka soo xiray Ra'iisal Wasaare Ku Xigeenka Dowladda Federaalka KMG ahna Wasiirka Gaashaandhiga, Mudane Xuseen Carab Ciise, oo ballanqaaday in Dowladda Federaalka KMG ay ka go'antahay inay sare u qaaddo ka qaybgalka haweenka ee hirgelinta Qorshe-hawleedka, gaar ahaana guddiyada kala duwan ee la sameyn doono.

Inkastoo guushan weyn ee la gaaray ay haweenka Soomaaliyeed u ahayd wax ay ku farxaan, haddana waqtigii la dabbaaldegi lahaa weli lama gaarin, maxaa yeelay caqabadaha iyo hawlaha dhabta ah weli way horeeyaan: waxaana ka mid ah in la xaqiijiyo in metelaadda boqolkiiba 30ka la gaarsiiyo iyadoo loo ololeynayo, xulashadana laga dhigayo mid si taxadir leh loo maareeyo iyo iyadoo la qabanayo tababarro taya dhis ah.

Tani waa waqtigii ay dhammaan haweenka Soomaaliyeed ugu dambeyntii sugayeen. Waxaan ugu baaqeynaa dhammaan dadka wax la wadaaga inay ku taageeraan si ay riyadan dhab uga dhigaan. ■

# Booqashadii Xoghayaha Guud ee Qarama Midoobay ku tagay Muqdisho

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Qaramada Midoobay Ban Ki-moon ayaa 9kii bishii December booqasho aan hore loo sii sheegin ku tagay magaalada madaxda Soomaaliya ee Muqdisho isagoo uu weheliyo Madaxweynaha Golaha Loo Dhanyahay ee Qaramada Midoobay, Naasir Cabdulcaziiz Al-Naasir.

Waa markii ugu horeysay ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay iyo Madaxweynaha Golaha Loo Dhanyahay ee Qaramada Midoobay iyagoo wada socda ku tagaan Soomaaliya, waana booqashadii ugu horeysay ee uu madaxa Qaramada Midoobay ku tago Soomaaliya in ku dhow labaatan sanno. Labada nin waxay la kulmeen Madaxweynaha Soomaaliya Sheekh Shariif Sheekh Axmed iyo hogaamiyeyaal kale, waxayna kala wada hadleen mustaqbalka siyaasadda iyo sida ay bulshada caalamku gacan u siin karto Soomaaliya.

"Waxaan halkan u nimid inaan aragno una kuurgalno isbedelka ka socda una muujino sida adag ee ay Qaramada Midoobay iyo bulshada caalamkuba u garabtaaganyihiin Soomaalia," ayuu Mr. Ban ka sheegay shir jaraa'id uu ku qabtay magaalada Muqdisho. "Waxaan rumeysanahay inaan marayno marxalad xasaasi ah – waqti fursad cusub u ah mustaqbalka dadka Soomaaliyeed," ayuu raaciyay.

Xoghayaha Guud wuxuu ku nuuxnuuxsaday baahida loo qabo in si dhakhsa ah hore loogu dhaqaaqo xagga siyaasadda ee Qorshe-hawleedka lagu dhammeynayo xilliga ku meelgaarka ee lagu heshiiyay bishii September 2011. Si dadaalladan loo kordhiyo, Xoghayaha Guud wuxuu ku dhawaaqay in Xafiiska UNPOS laga rari doono Nairobi una guuri doono magaalada Muqdisho, taasina waxay dhacday bishii Janaayo 2012, bil ka dib markii uu sidaa ku dhawaaqay.

Markuu ka laabtay magaalada Muqdisho kuna socday Xoghayaha Guud wuxuu booqday xerada qaxootiga Dhadhaab, ee ay ku noolyihiin tirada ugu badan ee qaxootiga Soomaaliyeed. Wuxuuna la kulmay qaxootiga iyo odayaasha ku nool xerada, iyo weliba shaqaalaha Qaramada Midoobay eek u hawlan kaalmada qaxootiga. Wuxuu booqashadaa ku tilmaamay mid "niyad jab iyo murugo leh" ■



Guud ee QM Ban Ki Moon oo jooga Muqdisho Soomaalya

# Hawlaha Guddiga Wadajirka ee Amniga

*WQ. Ismini Palla, Hawlwadeenka Isgaarsiinta Guud, UNPOS*

Kalfadhigii 12aad ee Guddiga Wadajirka ee Arrimaha Amniga (JSC) ayaa lagu qabtay magaalada Muqdisho 12kii iyo 13kii bishan Maarso. Dooddii la yeeshay labadii maalmood ee kulanka waxaa u badnaa horumarka dhowaan laga gaaray dhanka amaanka iyo arrimaha kale ee muhimka ah sida ciidamada booliska, militeriga iyo ciidanka asluubta.

Kulanka waxaa wada guddoomiyay Ra'iisal Wasaaraha Dowladda Federaalka KMG, Cabdiweli Maxamed Cali, Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Augustine Mahiga, Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika (SRCC), Boubacar Diarra, iyo wakiilka Urur-goboleedka IGAD, Patrick Nabiswa. Waxaa kaloo kulanka joogay wufuud ka kala socota Galmudug, Ahlu Sunna Wal Jamaaca iyo Guddoomiya/duqa magaalada Muqdisho. Bulshada caalamka waxaa metelay Maraykanka, Ingiriiska, Midowga Yurub, Talitaaniga, Japan, Norway iyo Denmark, iyo kuwo kaleba.

Isagoo kulanka la hadlaya, Danjire Mahiga wuxuu adkeeyay arrinta xasaasiga ah ee geddi-socodka. "Dadweynaha Soomaaliyeed iyo bulshada caalamku waxay filayaan horumar muhim ah oo la taaban karo," ayuu Ergeyga Qaramada Midoobay, isagoo intaa raaciyay inay shan bilood keliya ka hartay bisha Agoosto iyo in lagama maarmaan tahay in la xalliyo ismariwaaga ka dhex taagan baarlamaanka.

Ergadu waxay si qotodheer uga doodeen in ciidamada kooxaha la bahda ah Dowladda Federaalka KMG lagu dhafo lagu biiriyo Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed waxayna mar labaad sheegeen in loo baahanyahay inay jirto kala dambeyn iyo talis ciidan oo qeexan si ciidamada si hagaagsan loogu taageero.

Waxaa sidoo kale lagu nuuxnuuxsaday in amaanka dhulkii dhowaan la xoreeyay la sugo iyo in arrintaasi la waafajiyo istaraatijiyadda siyaasadda.

Kulanku wuxuu sidoo kale markii u horeysay taabtay arrinta dagaalyahanadii hore ee ka soo goostay kooxaha hubaysan iyo in lagama maarmaan ay tahay in barnaamij hub ka dhigis ee ku haboon loo dejiyo, iyadoo hawlgallada militeri ay hore u socdaan dhul badana la qabsanayo.

Sidoo kale waxaa la isla gartay in loo baahanyahay in barnaamij macaash ama hawlgab oo fiican loo sameeyo ciidamadii hore ee dhaawaca ah iyo kuwa curyaanka ah iyo qoysaska askartii geeriyootay ee ciidamada Soomaaliyeed.

Guddigu wuxuu sidoo kale garowsaday in loo baahanyahay in si degdeg ah lagu ansaxiyo Qorshaha Qaran ee Amniga iyo Xasilinta iyo in hawlihiisa waqtiyaysana lagu hirgeliyo waqtigii uu Qorshe-hawleedku u dejiyay.

Ra'iisal Wasaare Cabdiweli ayaa mar labaad ku celiyay in loo baahanyahay in la taageero Ciidamka iyo Booliska Soomaaliyeed, taasoo ah tallaabo muhim ah ee loo qaadayo in dalka lagu soo dabbaalo kala dambeyn buuxda. "Waxay u baahanyihiin taageerada lagama maarmaanka ah ee u suurtagelin doonta inay jebiyaan Al-Shabaab,' ayuu caddeeyay.

Wakiilladu waxay sidoo kale sheegeen in loo baahanyahay in la xoojiyo hay'adaha Garsoorka iyo Asluubta, iyadoo isla markaana la xoojinayo Ciidamda Booliska iyo Militeriga, taasoo ka mid ah tallaabo ballaaran ee loo qaado horumarinta ku dhaqanka sharciga iyo amniga Soomaaliya.

Ugu dambeyntiina, Guddigu wuxuu soo dhoweeyay qorshe hawleedka la dejiyay ee waafaqsan Qaraarkii Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 1612, ee lagaga hortagayo in carruurta ciidamada laga qoro. ■

# Qubanaha Kulamada Caalamiga ah




Kooxda xasaradaha caalamiga oo ku kulmaya Djibouti

Laba kulan oo caalami ah oo muhim ah ayaa Soomaaliya loo qabtay bishii Febraayo. Waxaa 5tii ilaa 6dii Febraayo Jabuuti lagu qabtay kulankii Kooxda La Xiriirka Caalamiga (ICG) oo isu keenay wakiillo sarsare ee ka kala socday Dowladda (oo kuu ka midyahay Ra'iisal Wasaaraha), Baarlamaanka, Puntland, Galmudug iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca iyo weliba afartan dowladood oo shisheeye iyo ururrada caalamiga ah, waxaana shirguddoomiyay Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Dr. Augustine Mahiga.

Kulanku wuxuu diiradda saaray saddex arrimood oo waaweyn. Dhanka hanaanka siyaasadda, ka qaybgalayaashu waxay isku raaceen inay lagama maarmaan tahay in xilliga ku meelgaarku uu dhammaado 20ka bisha Agoosto. Si arrintaasi ay u dhacdo, waxaa lagu heshiiyay in Soomaaliya ay u baahantahay inay dastuur cusub, ayna sameysato baarlamaan cusub oo intan ka yar oo metelaadiisana kan hadda jira ka fiicantahay ama qaybaha kala duwan ee bulshadu ay wakiillo ku leeyihiin si ka fiican sida hadda jirta, qabatana doorashada Guddoomiyaha Baarlamaanka, ku xigeenadiisa iyo Madaxweynaha. Taageerada ballaaran ee la siiyay Mabaadi'da Garoowe waxaa la raaciyay baaq loo jeediyay in la ballaariyo wadatashiga lala yeesho bulshada rayidka si go'aanada mustaqbalka la qaadan doono ay u noqdaan kuwo haysta taageerada ugu ballaaran ee dadweynaha. Kooxda ICG-du waxay ku dhawaaqday inay aad uga welwelsantahay tallaabada ay dhowaan qaadeen qaar ka mid ah Xubnaha Baarlamaanka ee isku dayay inay xilka ka qaadaan Guddoomiyaha Baarlamaanka, waxayna ka digtay in ciqaab la saari karo kuwa lagu sheego inay yihin "qaswadeyaasha". Dhanka xaaladda amniga, kooxdu waxay soo dhoweysay guulihii militeri ee ay dhowaan gaareen ciidamada AMISOM, kuwa Dowladda Federaalka KMG iyo kuwa ay bahwadaagta yihiin ayna kaga guuleysteen Al-Shabaab. Arrinta mudnaanta leh hadda waa in degaanada laga sameeyo maamullo shaqeeya iyo barnaamijyada xasilinta meelihii dhowaan la xoreeyay. Haddii aan u soo jeesano dibudhiska iyo soo kabashada, Kooxda ICG-du waxay ku dhiirigelisay saxiixeyaasha Qorshe-hawleedka inay dejiyaan qorshe faahfaahsan ee lagaga doodo shirka Istanbul ee la qaban doono sannadkan dhammaadkiisa lana xiriira siyaabaha loo horumariyo inay dadku helaan adeegyada asaasiga, sida waxbarashada, shaqada, kaabayaasha dhaqaalaha iyo waxyaabaha nabadda dhiirigeliya. Kulanka xiga ee Kooxda ICG wuxuu ka dhici doonaa magaalada Roma bisha May 2012.

Konton iyo shan wefdi ee ka socota Soomaaliya (oo ay ka midyihiin Madaxweynaha, Ra'iisal Wasaaraha iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka) iyo bulshada caalamka (oo ay ka midyihiin dhowr madax dowladi/xukuumado iyo ururrada caalamiga ah) ayaa ku kulmay London 23kii bishii Febraayo. Warmurtiyeedka faahfaahsan ee kulanka ka soo bahay wuxuu tixay heshiisyo kala duwan oo look ala qaybiyay toddoba arrimood. Dhanka hanaanka siyaasadda, ka qaybgalayaashu waxay mar kale ku nuuxnuuxsadeen inay lagama maarmaan tahay inuu dhammaado xilliga Dowladda Federaalka KMG dhammaadka bisha Agoosto. Waa inay jiraan tallaabooyin lagu dhiirigelinayo horumarka laguna ciqaabayo qaswadayaasha. Warmurtiyeedku wuxuu soo dhoweeyay in la sameeyay Guddiga Wadajirka ah ee Maareynta Maaliyadeed, wuxuuna ku baaqay in qadarin dheeraad ah la siiyo xuquuqda aadanaha. Dhanka amniga, kulanku wuxuu soo dhoweeyay Qaraarka ka soo baxay Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 2036, ee lagu ballaariyay awoodda AMISOM laguna kordhiyay tirada ciidamada. Ka qaybgalayaasha shirka London waxay ku nuuxnuuxsadeen inay ka go'antahay in la ciribtiro burcad badeedda, iyagoo garowsanaya in loo baahanyahay in dhibaatada si isku duuban wax looga qabto xagga berriga iyo baddaba. Ka qaybgalayaashu waxay ku heshiiyeen in la dhiso tayada gobolka si looga hortago argagaxida. Dhowr waddan ayaa ku dhawaaqday inay go'aansadeen inay ka qaybqaataan maalgelinta sanduuqa cusub ee la sameynayo ee loo yaqaano Sanduuqa Xasilloonida, si ay gacan uga geystaan taageerada la siiyo maamullada degaanada sharciga ah iyo sare u qaadidda adeegyada la gaarsiiyo dadka halkaa ku nool. Haddaan u soo jeesano arrimaha gargaarka baniaadanimo, ka qaybgalayaashu waxay ku heshiiyeen in gargaarka lagu xiro soo kabashada waqtiga fog. Ugu dambeyntiina, kulanku, isagoo soo dhoweynaya u guuridda UNPOS ay Muqdisho ugu soo guurtay, kulanku wuxuu ku heshiiyay hay'adaha oo dhan ay ujeeddo ka dhigan doonaan inay waqti badan joogaan gudaha Soomaaliya.

Shirarka caalamiga ah ee soo socda ee ajendaha ku jira bisha Juun waa Shirka 2aad ee Istanbul, oo daba socda Shirkii 1aad ee la qabtay bishii May 2010. Shirkii 1aad wuxuu diiradda saaray dibudhiska and horumarinta wuxuuna ifiyay xiriirka muhimsan ee ka dhexeeya dowladda iyo bulshada ganacsatada. Shirku wuxuu dhiirigeliyay in diiradda la saaro lix arrimood oo ah in marka ugu horeysa mudnaanta kowaad la siiyo ayna soo wada xuleen Dowladda Federaalka KMG iyo bulshada ganacsatada: waxayna kala yihiin: isgaarsiinta, kaabayaasha gaadiidka, dhoofinta xoolaha nool, kalluumeysiga, bangiyada (baananka) iyo xawaaladaha iyo tamarta badalka ah (badiilka ah). ■

# Barnaamijka hub ka dhigidda DDR oo nabad iyo xasilooni waarta u keenaya Soomaaliya

*WQ. Ismini Palla, Hawlwadeenka Isgaarsiinta Guud, UNPOS*



Xerada dagaalyahanadii hore ee Muqdisho

Muqdisho, 18 Maarso 2012 – In dagaalyahannadii hore ciidanka laga saaro, hubka laga dhigo bulshadana dib loogu soo biiriyo (celiyo) waxay qayb ka tahay in Soomaaliya laga dhaliyo nabad sugan oo waarta. Barnaamijkan hub ka dhigidda oo kale waxaa afka qalaad loogu yaqaanaa (DDR). Dhinacyada ugu muhimsan ee ka qaybqaata barnaamijka DDR-ka, oo ka mid yihiin Dowladda Federaalka KMG, maamullada degaannada, ciidamada AMISOM, hay'adaha Qaramada Midoobay iyo ururrada aan dowliga ahayn ayaa 17kii ilaa 18ii Maarso magaalada Muqdisho ku qabtay kulan hawleed laba maalmood qaatay oo ahaa kii u horeeyay oo lagu go'aaminayay hababka, kaalimaha iyo habraacyada lagu maareynayo dagaalyahanada soo goostay.

Kulan hawleedka waxaa soo qabanqaabiyay oo fududeeyay Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) waxaana shirguddoomiyay Wasiir Ku Xigeenka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka, Cabdihakim E. Guleed. Ka qaybgalayaasha waxaa ka mid ahaa Ku Xigeenka Duqa magaalada Muqdisho, Iman Ikar, Ku Xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika (DSRCC), Wafula Wamunyinyi, saraakiil sarsare ee ka socotay Dowladda Federaalka KMG iyo ciidamada AMISOM, wakiillo ka socday Galmudug, bulshada rayidka, hay'adaha Qaramada Midoobay, ururrada aan dowliga ahayn iyo bulshada caalamka.

"Maareynta dagaalyahanada soo goostay waa arrin aad u adag oo u baahan wadashaqayn iyo isuduwid wanaagsan. Waxay u baahantahay hanaan iyo istiraatijiyado iswaafaqsan oo dhammeystiran," sidaas waxaa yiri Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Dr. Augustine Mahiga, oo hadalkiisa halkaa laga akhriyay. "Waxaan u baahanahay inaan taageerno Dowladda, IGAD iyo AMISOM si aan u maareyno dagaalyahanada soo goostay oo go'aansaday inay ku soo biiraan geeddi-socodka nabadda," ayuu raaciyay.

Waqtigan xaadirka ah magaalada Muqdisho waxaa ka jirta hal xero oo keliya oo lagu maareeyo dagaalyahaniintii hore iyo laba xarun oo lagu dhaqanceliyo dhallinyaro gaaraysa 500 oo qof.

Waxaa kulanka lagaga dooday qeexidda dagaalyahanada soo goostay, hanaanka sharci iyo weliba siyaasadaha iyo habraaca caada ahaan lagu hawlgalo, iyadoo ay jireen xaalado gaar ah ee dadka xabsiyada ku jira iyo shuruudaha lagu dammaanadqaadi karo cafiska.

Kooxdu waxay kaloo diiradda saartay waxyaabaha gaarka u ah carruurya iyo qoysaska, iyagoo eegaya inay lagama maarmaan tahay in hanaan mar labaad lagu midaynayo qoysaska iyo taageero xagga maskaxda ah loo fidiyo dhallinyarada ay dhibaatadu saameysay. Waxaa sidoo kale muhim ah tallaabooyinka lagaga hortagayo dhallinyarada inay ku biiraan kooxaha hubaysan. "Tani waa fursad lagu taageerayo dhallinyaradeena lagu dammaanadqaadayo nabad iyo xasillooni oo ka dhalata Soomaaliya," ayuu yiri Wasiirka Guleed.

Kulan hawleedku wuxuu ku baaqay hab iskudhafan oo loo wada dhanyahay ee arrinta loo wajaho ayna ka qaybqaataan dhammaan wasaaradaha waaweyn, maamullada gobollada iyo degaanada, saraakiisa xuquuqda aadanaha, la taliyeyaasha sharciga, ururrada aan dowliga ahayn, hay'adaha Qaramada Midoobay, AMISOM, IGAD, bulshada degaankan iyo khubaro caalami ah haddii kormeer iyo dabagal lagu soo daro.

Ka qaybgalayaashu waxay ku nuuxnuuxsadeen in arrintan ay ahaato hawl ay horseed ka yihiin hay'adaha qaranka, waxayna mar kale xaqiijiyeen in loo baahanyahay in la sameeyo Xoghaynta Taageerda Farsamada ee arrimaha dagaalyahanada soo goostay, xoghayntaasoo si joogta ah u kulanta warbixina u gudbisa Guddiga Wasaaradeedka Wadajirka ah. ■



Mayor Mohamud Ahmed Nur greets children at the opening of a new Market



Funeral of former President, Abdullahi Yusuf. Credit: Stuart Price AU/UN IST

Mourners gather to pay their respects. Credit: Stuart Price AU/UN IST





UN





Somali president Sharif Ahmed opens new TFG Training Camp in Mogadishu. Credit: Anthony Hunt AU/UN IST



British Foreign Secretary William Hague (left) visit to Somalia. Credit: Stuart Price AU/UN IST

Celebrating the first international flight from Turkey.
Credit: Stuart Price AU/UN IST

